JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## FASALKA SADDEXAAD



# BARBAARINTA
# IYO
# CILMIGA BEESHA

## FASALKA SEDDEXAAD

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo
aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaasho.

Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar — 1975



Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre,
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ee
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

# TUSMO

Bogga

Rukumada asaasiga ah ee ummadnimada Soomaaliyeed 1

Dhalashadii Kacaanka Oktoobar . . . . . . . . 5

Muxuu Qabtay Kacaanku? . . . . . . . . . . 8

Iskaa wax u Qabso . . . . . . . . . . . . 11

Beerista iyo Beeraleyda . . . . . . . . . . . 15

Kalluunka iyo Kalluuumeysatada . . . . . . . . 22

Iskaashiga iyo Iskaashatooyinka . . . . . . . . .27

Isu baahnaanta iyo isla jirka . . . . . . . . . 31

Xafiiska Siyaasadda M.G.S.K. . . . . . . . . 33

Reer Guuraaga . . . . . . . . . . . . . . 35

Magaalada . . . . . . . . . . . . . . 41

Dhaqanka Soomaailyeed . . . . . . . . . . 47

# MAHADNAQ

Waxa aannu u mahadnaqaynaa Cabdiraxmaan Cusmaan Saciid iyo Caasha Xaaji Maxamed Xuseen oo buugga qoray iyo Ibraahim Maxamuud Abyan iyo Maxamed Cali Warsame oo isku dubbariday.

Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suqa geliyay soo saaridda kitaabka oo uu ka mid yahay Cawil Maxamed Yaasiin oo sawirrada u sameeyay iyo garaacayaashii garaacay.

**Bashiir Faarax Kaahiye**

Maamulaha Xafiiska Manaahijta

## GOGOLDHIG

Kani waa buuggii maaddada barbaarinta iyo cilmiga beesha ee gaarka u ahaa Fasalka saddexaad ee Dugsiyada Hoose.

Markuu ardaygu heerkaas waxbarashada ka gaaro waxaa lagama maarmaan ah in lagu beero akhris-jecayl, si ay awood-diisa akhrisku kor ugu kacdo, isla markaasna garashadiisa guud u ballaarato. Sidaas darraaddeed buugani waa ka duwan ya-hay kuwa fasalka Kowaad iyo Labaad ee Dugsiyada hoose. Labadda sannadood ee hore, kartida uu Ardaygu wax ku akhri-sanayaa waa yar tahay. Sannadka saddexaad marka uu soo galase, ardaygu wuxuu gaaray heer luqadiisa iyo akhriskiisu-ba ugu filan yihiin in uu iskiis wax u akhrisan karo, una fahmi karo. Ka duwanaantaasna w a x a keenay labadii Buug ee hore waxaa la tixgeliyey arrimo badan oo ay ka mid yihiin: (1) Inuu ereygu gaaban yahay, (2) Inuu yahay sabad, (3) Inuu buuggu ku dhisan yahay aragtida ardayga iyo waayo-a-ragnimadiisa maalin kasta (daily experiences). Tanise waa marxalad loo badanyahay inuu ardaygu barto siduu u akhriyi lahaa fikrado iyo erayo cusub oo ka baxsan kuwa uu yaaqaan. Waxaa kale oo loo baahan yahay inay dhisanto oo soo korto ga-rashada ardayga dhinaca siyaasiga iyo dhicaca Ijtimaaciga ahba. Taasna waxaa raaca inay tahay mar ardaygii ka gudbay heerkii waxbarashada hoose oo uu u gudbayo heerka waxbara-shada dhexe, da'diisuna waa inay ku dhowaatey markii uu no-qon lahaa xubin waxtar leh oo ka tirsan bulshada. Sidaas daraa-deed waxaa lagu dedaalay in casharada buuggu ay ahaadaan kuwa ku xiran nolosha mujtamaca Soomaaliyeed, saameeynaya-na waaga cusub ee Kacaanka ah iyo halganka Ummadda Soo-maaliyeed ay ugu jirto madax-bannaani dhaqaale, midnimo iyo caddaalad ijtimaaci ah.

Mujtamaca Soomaaliyeed wuxuu marayaa heer isbeddel weyni ku dhacayo. Waxaa laga guurayaa hab duug ah, waxaa-na meeshiisii ka dhismaya hab cusub iyo mujtamac cusub oo hantiwadaag ku dhisan. Waxaana loo baahan yahay da' cusub oo ka duwan kuwii hore, garashadooda iyo xilkasnimadoo-

duna ay sarrayso. Haddaba waa waajibka baraha inuu isaga oo cuskanaya casharrada buugga ardayga ku abuuro, Wacyi waddani ah iyo mid ijtimaaci ah.

Waana inuu ardayga ku dhiiri geliyaa inuu kororsado aqoontiisa guud, gaar ahaan wixii ku saabsan dadka iyo dalka Soomaaliyeed.

Baruhu marka uu ardayga u dhigayo casharka waa inuu tixgeliyaa bulshada ardaygu ku dhex nool yahay, bulshadaasi ha ahaato mid reer guuraa ah, mid beeraley ah, ama mid reer magaalo ahba. Waana inuu ka dhaadhiciyaa waxyaalaha isku xira kooxahaas kala duwan iyo isu baahnaantooda, isagoo oo tusaalooyin cad oo ardaygu garan karo u keenaya. Waxaa kale oo baraha looga baahan yahay inuu tusaale ahaan ugu wado ardayda si ay indhahooda ugu arkaan wixii suuragal ah markaas ee casharka ku saabsan. Waxaa ka mid ah in markii ardaydu baraynayso casharka ku saabsan beeraleyda iyo beeraha, ay ardaydu booqasho u tagaan beeraha, markii laga hadlaayo iskaashiga, waa in ay booqasho u tagaan iskaashatooyin kale duwan; markii laga hadlayo Iskaa Wax U Qabso, waa in ay booqasho ku tagaan meelaha lagaga shaqaynayo Iskaa Wax U Qabso.

Cashar walba waxaa la socda weyddiisyo dhowr ah oo ku saabsan Casharakaas, ujeeddaddeeduna waxay tahay in lagu ogaado in ardaygu casharka si wanaagsan u gartay iyo in kale. Waxaa kale oo la socda shaqa-Guri oo ay tahay in ardaygu soo qoro markuu gurigiisa tago, si loogu dhiiri geliyo wax qoridda iyo iskaa wax u qabsad. Shaqada Gurigu waa tusaale ahaan,lakiin macallinka ayaa laga rabaa inuu ardayda siiyo shaqa-Guri, sida ay isaga la tahay marka uu casharka bixiyo

Cashar kasta marka la bixinayo, waxaa waajib ah in lagu dhaqmo oo la raaco jidka soo socda:

1. Marka casharka la bilaabo ilaa marka uu dhammaanayo, waa in ardaygu uga qayb galaan si nool, barahana waxaa waajib ku ah inuu ardaydiisa ka qayb geliyo casharka uu bixinayo. Waxaad doonaysid

inaad ardada u sheegtid, ama bartid, weydii ardayda marka hore, ka doon jawaabta inay helaan dabadeedna si tifaftiran ugu sharax.

2. Isku day, inta aad kari kartid, in casharku noqdo mid xiisa leh oo ardaydu jeclaato, haddii kale ardaydu waa ka xiisa dhacaysaa casharka iyo adiga baraha ahba.

3. Waxaa ardayda xiisahooda kicin kara, casharkaagana uga dhigi kara mid la fahmo marka aad isticmaashid qalabka dadka wax lagu baro **(VISUAL AIDS)**. Waa lagama maarmaan in aad uruursato qalab ku kaalmeeya marka aad Casharka bixinayso.

4. Cashar kasta fikrad asaasi ah ayaa ku jirta, ujeeddaana laga leeyahay fikradahaas. Bar ardayda fikradahaas iyo ujeeddada laga leeyahay. Hubso oo sug in ardaydu fikradahaas fahmeen oo qaateen.
Ka soo saar fikradaha casharka marka hore.

5. Casharadu waa inay isku xirxiran yihiin oo isku dhisan yihiin. Isugu xiji casharada sida ay isu leeyihiin, oo isugu dhow yihiin, isuna raaci karaan.

6. Cashar kasta marka uu dhammaado, waa in ardayda la siiyaa layliyaal ay kaga shaqeeyaan dugsiga dhexdiisa ama gurigaba u qaataan. Waxa jira layliyaal aan ku soo qornay cashar kasta dhammaadkiisa. Layliyaashaas waa tusaale ahaan qudha. Waxa lagaa filayaa inaad laylisyo farabadan adigu ardayda casharka uga soo saartid ama samaysidba.

**(«Eebbe ha ina waafajiyo»)**

Xafiis ahaan waxaanu macallin kasta ka codsanaynaa in uu wixii dhalliil ah ee uu buugga kala kulmo na soo ogeysiiyo. Marka aad buugga dhigayso waxad maskaxda ku hayaasaa in buuggani yahay buug maaddada kacaanka ka hadlaya kii ugu horeeyey, sidaa darteed waxa dhacaysa in buuggu dulduleel yeesho.

Marka waxa haboon in aadan dulduleellada uun tilmaamine, talana ka dhiibataa sidii loo daweyn lahaa.

Casharka Koowaad

# RUKUMMADA ASAASIGA AH EE UMMADNIMADA SOOMAALIYEED

Soomaaliya waa dalkeenna weyn ee aan jecel nahay. Dalka Soomaaliya lama yiraahdo dhulka ciidda ah keliya, ee wuxuu ka koobmaa ciiddiisa (ama berriga), baddiisa, cirkiisa, hawadiisa, dadkiisa, duunyadiisa, iyo wax kasta oo laga helo korkiisa. Waxaas oo dhan Soomaalidaa wada leh, waa hantidoodii, sidaas daraaddeed waa wada dhaqdaan, waa wada dhaqaaleystaan, waana wada daafacaan, cid kale uma ogola inay soo fara geliso.

DALKEENNA Soomaaliya ma aha inta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ay ku fadhido oo keliya dhulka Soomaaliya waa ka weyn yahay intaas, dadkiisuna waa ka badan yahay inta deggan Jamhuuriyada. Dadka iyo dalka ay Jamhuuriyaddu ka dhisan tahay waa Soomaaliya inta xorta ah, ee gobanimada haysata oo qura. Dalka iyo dadka intoodii kale waxay ku jiraan gacanta gumeysiga; Amxaaro, Faransiis iyo Keenya.

Inkasta oo dalka Soomaaliya uu qaybsan yahay oo la kala haysto, haddana waxaa jira rukumma asaasi ah oo ummadnimada Soomaaliyeed ay ku dhisan tahay. Rukumadaa waaweyn oo ay qowmiyaddeennu ku dhisan tahay waxaa weeye:

I. Af keliya (af Soomaaliga) oo ay ku hadlaan.

II Diin keliya (Diinta Islaamka) oo ay aaminsan yihiin.

III. Dhaqan iyo dhalasho isku asal ah.

IV. Dhaqaale isku Dabeecad ah.

## I. Af Soomaaliga

Dadka Ummadda Soomaaliyeed waa dad leh af keliya oo la yiraahdo Af Soomaali, afkaasey ku wada hadlaan, isku gartaan, wax ku bartaan, ra'yiga isku dhaafsadaan. Af Soomaali-

gu inkasta oo uusan qornayn Kacaanka ka har, haddana wuxuu ahaa Af hodan ah oo loogu isticmaali jiray nolosha dhinacyadeeda badan. Af Soomaaligu ma uusan ahayn af lagu wada hadlo oo qura ah ee wuxuu ahaa afka xeerka, dhaqanka, dhaqaalaha, siyaasadda, xigmadda iwm. Isagaa garta lagu qaadi jiray, lagu dhaqmi jiray, lagu gabyi jiray, lagu geeraari jirey, lagu heesi jirey, lagu mahmaahi jirey, murtida iyo xigmada lagu sheegi jirey, lagu xisaabtami jirey, wixii la rabo lagu qaban jirey. Sidaas daraaddeed af Soomaaligu wuxuu ahaa, walina yahay tiir ka mid ah tiirarka waaweyn oo ay ku taagan tahay qarannimada Soomaaliya. Afku waa midka isku xira ummadda Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaanba.

## II. Diinta Islaamka

Dadka Soomaaliyeed waa dad haysta diinta Islaamka. Soomaalida oo dhami waa wada muslim boqolkiiba boqol (100%). Dadka Soomaaliyeed dagaal iyo khasabkuma gelin Diinta ee iskood ayey u amineen waagii ay soo dagtey, ilaa haatanna ayaday ku dhaqmaan. Diintooda ayey wada daafacdaan. Diinta Islaamku waxay ka mid tahay saldhigyada waaweyn ee ay ku fadhio midnimda ummadda Soomaaliyeed. Afka iyo Diintu waxay ka mid yihiin Rukummada, ay ku taagan tahay qowmiyaddeennu.

Haddaan dadka isku waddanka ahi, aynan isku af iyo isku diin ahayn, waa adag tahay in ay isku xirmaan, isna jeclaadaan.

## II. Dhaqanka iyo Dhalashada

Soomaalidu waa ummad ka mid ah ummadihii dhaqanka iyo taariikhda fog lahaa. Dhulkeennu wuxuu caan ku ahaa taariikhda dunida. Waxaa loo yiqiin dhulka «udugga» ama «Carafta» Soomaalidu meel ayey ka soo wada jeedey waxayna lahayd dhaqan iyo hidda u gaar ah.

## IV. Dhaqaale isku dabeecad ah

Haddii aan nahay ummadda Soomaaliyeed, waxaan leenahay, af, diin, dhaqan iyo dhalasho isku mid ah, kuwaas

oo calaamadu u ah midnimada ummaddeenna Soomaaliya. Waxaa sii raaca saddexdaas rukun mid afaraad oo muhiim ah; kuwaas oo ah dhaqaale isku dabeecad ah. Af iyo dhaqan isku mid ah waxaa keena, ama dhaliya, hab dhaqaale oo isku heer ah. Guud ahaan, nolosha dhaqaale ee dadka Soomaaliyleed waxay u qaybsantaa saddex qaybood oo waaweyn: 1) nolol miyi ama reerguuraa. 2) Nolol beeraley 3) Nolol reer magaale.

Saddexdaba waxaa saldhig u ah oo ay ka soo jeedeen inta badan reer miyiga, waxaase hadda loo halgamayaa in lagu wada noolaado nolol reer magaalnimo. Dadka Soomaaliyeed, intooda badan, waa xoola dhaqato, sida geela, lo'da iyo ariga waana lafdhabarta dhaqaalaha waddanka. Waana mujtamaca dadkiisa oo idil, ay iskaashadaan, Dhaqaalahooda, iyo noloshooda ijtimaaciga ahi waa isku mid. Dadka Soomaaliyeed ee reer magaalka ah iyo kuwa beeraleyda iyo reer guuraaga noloshoodu way isku tahay. Nolosha sidaas ah ee dadka intiisa badani ay ku nool yihiin waxay keentay dabeecad dhaqaale oo isku mid ah. Qowmiyadda Soomaaliyeed waxay ku dhisan tahay rukumadaas waaweyn ee aan horay u soo sheegnay. Waxayna keentay inaan isku si uga danqanno cadawga isku midka ah ee aan leenahay.

Cadawgeennu waa gumeysiga dalkeenna haysta sida Faransiiska. Amxaarada iyo Keenya. Waxay kaloo keentay in aan leenahay ujeeddooyin isku mid ah. Ujeeddooyinkaas waxaa ka mid ah: Mideynta dadka iyo dalka Soomaaliyeed iyo in la hirgeliyo mabda'a hantiwadaagga si loo gaaro barwaaqo, caddaalada iyo sinaan.

**Weydiin**

1. Yaa gumeysta dalalka soomaaliyeed ee aan Jamhuuriyada ka mid ahayn ?
2. Waa maxay rukummadda qowmiyadda Soomaaliyeed ay ku dhisan tahay ?
3. Sheeg kaalinta Afkeennu lahaa intii aan la qorin ?
4. Maxay yihiin dadka Soomaaliyeed intooda badani ?

5. Maxaa keenay inay Soomaalidu isku wax ka wada danqato ?

6. Waa maxay ujeeddada dadka Soomaaliyeed ?

### Shaqa Guri

1. Ka soo qor ilaa 5 sadar rukummada qowmiyadda Soomaaliyeed.

Casharka Labaad

# DHALASHADII KACAANKA OKTOOBAR



Kacaanka Oktoobar waa go'aan ka dhashay halgankii iyo dagaalkii dheeraa ee uu dadka Soomaaliyeed la galay gumeeystayaashii qaybsaday waddankeenna. Halgankaas iyo dagaalkaasi marnaba ma joogsan; ee gobbanimo, midnimo iyo sinnaan ijtimaaci ah waa waxyaalaha dadweynaha soomaaliyeed dooni jirey weligiis inuu gaaro. Dhalashadii kacaanka ka horna ma suura gelin in dadweynaha Soomaaliyeed gaaro wuxuu doonayey, maxaa yeelay waxaa ka hor yimid dhibaatooyin fara badan.

## Weerarkii Gumeysiga iyo qaybinta dalka Soomaaliyeed

Iyadoo Ummadda Soomaaliyeed ku nooshahay nabad, barwaaqo iyo isku xirnaan, baa waxaa ku soo duulay cadow la yiraahdo gumeysi. Gumeysiga, Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo dhulfidsatada Xabashida bay ahaayeen kuwii ku soo duulay dalkeenna qarnigii 19aad qaybtiisii dambe. Gumeysigu wuxuu dalkeenna u qaybsaday shan meelood. Iyadoo ujeeddadiisa ahayd inuu khayraadka dhulkeenna dhaco, dadkana ku shaqaysto. Wuxuu ku dadaaley inuu dadka kala saaro iskuna diro si arrimihiisu ugu fulaan, wuxuuna ka helay

xoog qiima jaban iyo dhul barwaaqo badan. Gumeysigu wuxuu weligiis hortaagnaa qaranimada iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.

Wuxuuna inagala dagaallamay aqoonta, dhaqanka, dhaqaalaha iyo wixii horumar ah oo idil. Hase yeeshe, in kasta oo cadaadiska gumeysigu waqti dheer socdey, marna ma damin dagaalkii gobanimadoonka dalkeennu.

## Halgankii Gobanimadoonka

Dadweynaha Soomaaliyeed marna gumeystayaasha isuma dhiibin. Laga bilaabo markii gumeystihii ugu horreeyey cagta soo dhigay carrada Soomaaliyeed, ilaa maantadan la joogo, ma joogsan halganka iyo dagaalka Ummaddeennu. Sayidkii buu ahaa geesigii hoggaaminayey dagaalyahannadii Daraawiishta ee labaatanka sano in ka badan la dagaalamayey gumeysigii Ingiriiska, xabashida iyo Talyaaniga. Ka dibna waxay ahaayeen dhallinyaradii asaastay xisbigii S.Y.L., S.N.L. iyo U.S.P. oo ahaa dadweynaha Soomaaliyeed iyo dhaqdhaqaayadii waddaniga ee waayadii dambe dhashay. Dadka Soomaaliyeed halganka dheer ee uu gobanimadiisa u soo galay, dhiig badan baa ku daatay, dad badanna naftoodii bay u hureen. Taasi waxay caddeynaysaa gobannimada iyo calanka aynu ku hoos nool nahay inaan sahal lagu helin ee kumanyaal qof u soo dhinteen. Jidbaale, Dagaxtuur iyo Eshaca waa meelihii gumeysiga iyo gobanimadoonka Soomaliyeed iskaga hor yimaadeen. Halgankaas dheeri wuxuu keenay in laba qaybood oo ka tirsan dal-weynaha Soomaaliyeed xoroobaan oo midoobaan.

## Gobanimo iyo wixii ka dambeeyey

1960kii, bay ahayd markii Soomaalidu, meel kasta ha joogtee, ay u dabaal-degtey dhalashadii Jamhuuriyadda Soomaaliya iyaga oo ku hanweyn inay noqoto horseedkii gobanimada iyo mideynta Soomaaliya oo dhan. Nolol cusub, sinnaan ijtimaaci ah iyo horukac dhaqaalana la gaaro. Hase yeeshee, waxaa Dawladda qabsaday koox yar oo ku xiran gumeysiga, kana fog danaha dadweynaha.

Muddo toban sannadood ku dhow ayey waddaanka maamul xumo, kala qaybin, dhac iyo musuq-maasuq ku wadeen. Dadweynaha oo ka xannuunsaday, una adkeeysan waayey maamul xumadii, iyo hogaankii horukaca ahaa ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayaa arooryaddii hore ee 21kii Oktoobar, 1969, dhaliyey Kacaankeenna barakeysan. Waxa hoggaaminayey nin ah geesi, gumeysi diid, gobanimo-u-doode, ninkaas oo ah, jaalle Siyaad.

## Weydiin

1. Muxuu ka dhashay Kacaanka Oktoobar ?
2. Sidee u noolayd Soomaalidu gumeysiga ka hor ?
3. Immisa qaybood buu gumeysigu u qaybiyey dalkeenna ?
4. Sheeg laba goobood oo ay ku dagaallameen Soomaalida iyo gumeystuhu ?
5. Ayaa hogaaminayey dagaalyahannadii Daraawiishta ahaa ?
6. Magacaw laba xisbi oo waddani ah oo u soo halgamay gobannimada iyo midnimada Soomaaliyeed ?
7. Ayuu u dhashay Kacaanka Oktoobar ?
8. Ayaa dhaliyey Kacaanka Oktoobar ?
9. Ayaa hoggaaminayey Kacaanka Oktoobar ?

## Shaqa Guri

ka soo qor afar sadar hoggaamiyaha Kacaanka Oktoobar ?

Casharka Saddexaad

## MUXUU QABTAY KACAANKU

Waa wax la wada ogsoon yahay in nolosha dadweynaha Soomaaliyeed wax weyni iska beddeleen Kacaankii Oktoobar intii ka dambeeysey. Isbeddelkaasina waa mid ku dhisan dar-yeelidda danaha dadweynaha iyo horukaca noloshiisa dhinac walba. Lamana soo koobi karo tallaabooyinkii iyo barnaamij-yaddii ujeeddadoodu ahayd dhismaha iyo horukaca mujtama-ca hantiwadaagga ah ee kacaanku tan iyo hadda hirgeliyey, hase yeeshee waxa aynnu wax ka sheegeynaa kuwa u waaweyn oo ahi:

### 1. Hantiwadaagga Cilmiga ah

Kacaanku bilowgiisiiba wuxuu aqoonsaday, inuusun dadka Soomaaliyeed marnaba gaari karin horukac dhaqaale iyo cad-daalad ijtimaaci ah haddii uusan qaadin waddada hantiwada-agga Cilmiga ah. Maxaa yeelay, waa nidaamka keliya ee wad-damada soo koraya, keennuna ka mid yahay, ay kula dagaalla-mi karaan gaajada, aqoon-darrida iyo dibudhaca, kuna gaari karaan barwaaqo, horukac dhaqaale iyo sinnaan ijtimaaci ah. Isla markaasna waa nidaamaka la isku hortaagi karo gumeysi-ga, Imberyaaliyada, maalqabeenka adduunka iyo dibusocodka gudaha, oo iyagu doonaya inay dhacaan shacabka. Sidaas da-raaddeed waa tallaabo taariikh weyn lah.

### 2. Horumarka Dhaqaalaha

Kacaanka ka hor dhaqaalaha waddanku aad buu u liitey. Gacantana wuxuu ugu jirey dad shisheeye ah iyo koox yar oo Soomaali ah oo shisheeyaha ku xirnayd. Si arrintaas foosha xuu kaloo ku saabsanaa in la abuuro wakaalad lagu maga-ago dhaqaalaha waddaniga ah, golaha Sare ee Kacaanku wu-xuu soo saaray sharciga lambarkiisu yahay 26, ee soo baxay, 6dii maajo 1970. Ujeeddadu waxay ahayd Dawladdu inay la wareegto shirkadihii iyo bangiyadii shisheeyuhu lahaa. Wu-xuu kaloo ku saabsanaa in la abuuro wakaaladdo lagu maga-caabo Wakaaladda Ganacsiga Ummadda. Shaqadeedu waxay tahay ganacsiga cuntada iyo waxyaalaha kale oo lagama maar-maan u ah daqaalaha ay maamusho.

Sidaas waxaa kaloo raaca inay Dawladdu barnaamij dheer u dejisey horumarinta sancada, beeraha, xoolaha iyo macdanta. Taasna waxaa tusaale u ah dhulka la beero oo sanad walba ballaarta, warshadaha meelaha badan laga dhisay ama la dhisayo.

### 3. Arrimaha Gudaha

Kacaanku wuxuu beddeley habkii hore ee lagu maamuli jirey arrimaha gudaha ee ku dhisnaa nidaam la'aan iyo nabad la'aan. Waxaynu ku beddelnay nidaam iyo maamul hantiwadaag ah oo dhowraya nabadgeliyada iyo midnimada dalka Soomaaliyeed. Si loo gaarsiiyo, loogana simo dadweynaha waxtarka xubnaha dawladda, waxaa la dhaqan geliyey nidaamka dawladaha hoose. Dalkana waxaa loo qaybiyey Gobollo iyo degmooyin fara badan.

### 4. Arrimaha Dibedda

Kacaanku wuxuu u soo hooyiyey dadka iyo dalka Soomaaliyeed magac dheer iyo sharaf. Taasna waxaa sabab u ah siyaasadda Kacaanku kula dhaqmo dawladaha adduunka iyo ururada caalamiga ah. Taa waxa cadaynaya doorka wanaagsan ee horukaca ah oo ay Soomaaliya ka cayaarto ururka Midowga Afrika dhexdiisa iyo taageerada ay u fidiso ururada gobanimadoonka Afrika iyo aduunka. Waxaa taas raaca kubiiridda Soomaaliya ay ku biirtay Jaamacadda Dawladaha Carabta, si waddankeennu kaalin weyn uga qaato arrimaha adduunka.

### Shaqo Guri

Ka qor 5 faa'iidadood qorista af Soomaaliga.


### Weydiin

1. Muxuu ku dhisan yahay isbeddelka waddanka saameeyey kacaankii Oktoobar ka dib . . . . . . . ?
2. Maxay aqoonsatay Tawraddu bilowgiiba . . . . ?
3. Jidkee baa lagu gaari karaa sinnaan iyo caddaalad . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?

4. Muxuu Kacaanku ka qabtay dhinaca nabadgeliyada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?
5. Waa maxay ujeeddada nidaamka Dawladaha hoose . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?
6. Sheeg saddex tallaabo oo waaweyn oo Kacaanku ka qaaday dhinaca waxbarashada iyo barbaarinta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?
7. Ayuu gacantiisa ku jirey dhaqaalaha waddanka intii kacaanka ka horeysey . . . . . . . . . . . . . ?
8. Waa maxay ujeeddada sharciga soo baxay 6dii Maajo 1970 . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?
9. Qoraalka fartu muxuu faa'iidooyin u leeyahay dadka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . ?

Casharka Afraad

# ISKAA WAX U QABSO



Iskaa wax u qabso waa mabd'a kacaankeennu dhaqan geliyey in dadweynaha lagu abuuro isku kalsooni, lana ururiyo awooddiisa, si ay u suuragasho in wadajir looga hortago dhibaatooyinka horjooga horumarkeenna. Hirgelinta falsafada iska wax u qabso,waxay banaanka u soo saartay, mujisayna waxtarka iyo faa'iidada weyn ee la gaari karo, haddii uu dadweynuhu isagoo isku duuban ku dhaqaaqo shaqo saameyneysa danihiisa guud. Waxay kaloo caddaysay in haddii aynnu cuskanno awooddeenna dhibaatooyin badan oo ku saabsan horukaca waddanka wax weyn laga qaban karo. Iskaa waxu qabso waa rukumadda waaweyn ee jidka isku fillaanshaha iyo isku kalsoonida lagu dhisayo, dhaqaalaha, daqanka iyo guud ahaan nolosha dadka Soomaalida.

## Iskaa wax u qabso
## Liibaan iyo Ladan

Liibaan wuxuu ahaa wiil yar oo arday ah. Da'diisu waxay ahayd toddoba jir. Liiban wuxuu ahaa wiil ildheer, oo faaqidaad badan. Waxkasta marka uu arko iskama dhaafi ji-


rin ee waa ka fakari jirey. Maxay yihiin waxaani ? Wuxuu su'aali jirey hooyadi, aabbihi, iyo qof kasta oo markaas u dahw. Sidoo kale wuxuu maqlo waa qabsan jiray, ujeeddadoo-dana dadkuu weyddiin jirey. Wuxuu maqlo waxaa ugu bad-naa hadalka: **«Iskaa wax u qabso»**, macnahiisase aad uma uu-san garanaynin, wuxu maqli jiray hooyadii, ladan, oo leh: «Iskaa wax u Qabsaan ka imid». Aabbihii oo leh: «Qadada ku dhakhsada. Iskaa wax u qabsaan u noqone». Walaalihii oo leh: «nadaafadda iyo dhismaha dugsigayaga Iskaa wax u yaan wax ku qabsanaa. Dugsiga aad wax ku barato, qalabka qabsaan kaga shaqaynay.» Liibaan waxaa maskaxdiisa ku wareegeysey ujeeddada iskaa wax uqabso. Liibaan aad buu isu weyddiin jirey iskaa wax u qabso.

Galabtii dambe, ayaa Liibaan iyo hooyadii ay u baxeen su-uqa. Jidkii ay sii marayeen ayuu ku arkay iskaa wax u Qabso ku qoran. Waxay sii mareen oo kale Golaha Hanuuninta Xa afadda. Waa Yaab! Isagana waxaa ku qoran «Iskaa wax u qabso», ayuu is yiri Liibaan. Waxaa jidka dhiniciisa uga mu-uqday daar weyn oo dheer, oo qurux badan. Iyadana waxaa ku qoran: «Bil gudaheed ayaa Iskaa wax u qabso lagu dhisay». Markii Liibaan iyo hooyadii Ladan ay gaareen suuqii, ayuu arkay naftiisii oo ay ku qoran tahay. Soo noqodkoodii ayey iska dareemeen daal. Waxay fariisteen beerta lagu nasto. Liibaan iyo ladan waxay ku fadhiyeen kursiga beerta. Waxaa indhahoodii qabteen loox ay ku qoran tahay: «Iskaa wax u qabso». «Waa Yaab»!! meel kastoo fiicanba waxaa ku qoran Iskaa wax u qabso». «Waa maxay».

Liibaan su'aal buu waydiiyey hooyadii, «hooyo, meel ka-sta oo fiican waxaa ku qoran «Iskaa waxa u qabso» mar kaa-stana waa maqlaa Iskaa wax u qabso, ee waa maxay iskaa wax u qabso? Ladan waxay tiri: «Iskaa wax u qabso» waa caqliga, xoogga, xoolaha dadkoo dhan oo laysu geeyo, kadib-na wax lagu dhiso. Iskaa wax u qabso oo faa'iido inoo leh ayaan wax ku qabsanaa. Dugsiga aad wax ku barato, qalabka wax lagugu baro, sida buugga, taabaashiirta, kuraasta, miisas-ka, iwm, isbitaalka aan daawada ka qaadano, jidka aan maro, suuqa aan wax ka gadano, beerta aan ku nasanno, Golaha Ha-nuuninta, kuwa cayaaraha, beeraha cuntadu nooga baxdo, warshadaha,iwm. iskaa wax uqabso ayaa lagu dhisay, inna-

gaa ka faa'iidaysanna, dadkoo dhan baa waxaas leh, «haddii qof qof loo leeyahay meelahaas, maxaa dhici lahaa, hooyo ?» Dadka meelahaas ka shaqeeyana annagay inoo shaqeeyaan.

Waxaa waajib ah inaan xurmayno.



«Iskaa wax u qabso waa dadkoo hawsha,hantida, iyo ra'yiga isu geystey, isna maqla, kadibna kula soo baxa cuntada, dharka, daawada, iyo guryo ku filan, oo u qalma. Ladan waxay tiri; wixii la doonaba Iskaa Wax U Qabsaa lagu heli karaa. Waxbarashada, dhaqaalaha, siyaasadda, waxay ku socdaan Iskaa wax u qaabso. Iskaa wax u qabsana waxay ku fadhidaa mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag. Hooyo, wax kastoo fiican waxaan ku hellay Iskaa wax U Qabso: Wax kastoo xunna, waxaan iskaga celinna Iska wax u Qabso. Iskaa wax u qabso waa fikraddaan doonayno inaan waddankeenna ku dhisnno. Haddaba Iskaa wax u qabso waa nolosheenna hadda iyo hadhowba, «bay ku soo gabagabaysay Ladan hadalkeedii».

**Weyddiis**


1. Immisa jir buu ahaa Liibaan ?
2. Muxuu ahaa Liibaan ?
3. Muxuu ka maqli jirey hooyadiis iyo Aabbahiis ?

4. Xaggee buu Liibaan hooyadiis u raacay ?
5. Muxuu weydiiyey Liibaan hooyadiis ?
6. Maxay Liibaan hooyadiis ugu jawaabtay?

## Shaqa Guri

1. Ka soo qor 6 sadar oo aad kaga hadlaysid iskaa wax u qabso aad ka qayb gashay ?

# BEERISTA IYO BEERALEYDA



Wax Beeristu waa shaqo taariikh aad u dheer leh. Markii aadamigu gartay in, haddii uu dhulka ku rido miraha dhirta iyo caawsku, ay markiiba geedo mira badan dhali karaan, waxaa lagu tilmaami karaa bilawgii horukaca nolosha aadmiga. Maxaa yeelay wuxuu ka adkaaday cadowgiisii koowaad, oo ah gaajada. Markii talaabadaas kacaanka ah dadku qaaday, waxaa ku xigtey inuu kala saaro dhirta, uu beerto midkii mirihiisu macaan yihiin oo badan yihiin, dhibaatana aan u keenin iyo inuu magaalooyin dhisto oo uu wareeggii iyo socodkii joogtada ahaa ee ugaarsiga ku kelifi jirayna ka kaaftoomo. Wax beertistu dunida oo idil isla mar qur ah kama wada bilaabmin, ee way ku kalu horaysay. Wxaase la isku raacsan yahay in wabiyada waaweyn ee bariga dhexe, ka bilaabantay wax beerristu.

## Wax yaalaha lagama maarmaanka u ah beerista

Beeristu waa shaqo ku dhaqaaqeedu ku xiran yahay shuruudo abdan oo ay u waaweyn yihiin:

In la helo biyo beeraha lagu waraabiyo oo kufilan

2. Inuu jiro dhul ciiddiisu wax beerista ku habboon tahay.

3. Inay jirto hawo wanaagsan oo wax beerista ku habboon.

## Beeraha iyo Biyaha Waddankeenna

Waddankeennu wuxuu leeyahay biyo ku filan in lagu beero dhul weyn, kuwaas oo u qaybsama sida hoos ku qoran:

**Webiyada:** Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed waxaa dhex mara labada webi oo ah Jubba iyo Shabeelle. Kuwaas oo ka keena biyo fara badan dalal kale; sanadkii laba jeer bay biyo xoog leh keenaan. Jubba ma engego, Shabeellese sida badan labo ama saddex bilood buu sanadkii engegaa. Labada webi waxay waraabin karaan dhul aad u ballaaran, oo ka badan inta hadda ay waraabshaan.

**Roobka:** In kasta oo aan lagu tirin waddankeenna dalalka uu aad roobku ugu badan yahay, haddana Gobollada badidooda roobka ka da'aa wuu ugu filan yahay wax beerid. Sidaas daraaddeed dhulka roobka lagu beeraa wuu ka ballaaran yahay kan Webiyada ku baxa.

## Durdurrada iyo Ceelasha

Dalkeenna waxaa ku badan Ilaha iyo durdurrada. Biyaha iskooda dhulka uga soo baxa waraa lagu waraabiyaa beeraha, waxayna ku badan yihiin Gobollada roobku yar yahay, Webiyadana aan lahayn, sida Bari Sanaag, Nugaal, Tog - dheer iyo Bay. Waxaa kale oo jira in waayadan dambe ay bateen beeraha ceelasha lagu waraabiyo, in kasta oo ay hawl iyo xoola dadka kaga baxaan.

## Xilliyaasha Beerista Waddankeenna

Waddankeenna guud ahaan waxaa wax la beeraa, labada xilli ee ah Guga iyo Dayrta, kuwaasi waa labada xilli ee roobka badidiisu innoo da'o, waxayna ku toosan yihiin labada jeer ee Webiyadu biyaha badan keenaan.

## Diyaarinta Dhulka



Dhulka inta aan abuurka lagu ridin ka hor, beeraleydu waxay ka qabtaan shaqooyinka ah: carrageddis, carra jebis, jibaallayn iyo kali jeexid. Haddii waraab lagu beero waxay ku dadaalaan inuu dhulku sinnaado si biyuhu beerta u wada gaaraan, dhirtuna isku mar soo baxdo, una wada bislaato. Ka dib marka ay soo baxdo, caawska ayey ka guraan dhawr jeer, markay oontana wey waraabiyaan, intaas oo dhan cudurrada cayayaanka iyo dugaagga ayey ka ilaaliyaan. Shaqooyinkaas iyo dadaalkaas oo idil waxay ujeeddadu tahay in la gurto mira badan oo caafimaad qaba. Shaqooyinkaas oo dhan waxaa lagu sameeyaa gacan ama xoolo ama Cagaf-Cagaf hadba awoodda beeraleeydu intay gaarto ama shaqada nooceedu sida ay tahay.

## Wareejinta Beerista

Wareejinta beeristu waa lagama maarmaan in lagu socdo. sababtu waxay tahay, dhulka haddii xilliya isku xiga isku nooc lagu beero dhulka ayaa nafaqadu ka dhammaanaysa, cu-

durro iyo cayayaan badanina wey ka dhalanayaan, wax soo saariddiisuna way yaraanaysaa. Sidaas daraaddeed beeraleydu laba xilli oo isku xiga isku nooc isla meeshii kuma beeraan. Xilli waxaa laga yaaba inay galley beeraan, xillina sisin Xilli kalena waxyaalo kale oo kuwaa ka duwan. Marka sidaa dhulka wixii lagu beerayey loo wareejiyo, wixii soo baxayey isma dhimaan.

## Nolosha Beeraleyda

Dad badan oo Somali ah ayaa beerista ka shaqaysta, waxayna u qaybsan yihiin kuwa beeraha oo keliya ka shaqaysta iyo kuwa beerahana ka shaqaysta, xoolana dhaqda. Kooxda hore, waxay degtaa webiyada hareerahooda halkaas oo xooluhu ayan ku noolaan karin, badina gendi iyo cudurro kale yeesha.

Kooxda kale waxay degtaa dhulka webiyada ka durugsan, badiba, cudurana aan lahayn, roobkana wax lagu beero.

Badi waxa dhacda in qoyska beeraleyda ahi yar iyo weynba dhex degaan beerta markii shaqadu badan tahay, gaar ahaan, markey beertu bislaato, si xoolaha iyo dugaagga looga celiyo. Beeraleydu waxay wax u beeraan in ay wixii u soo baxa, bar iibiyaan, barka kalena ay cunaan.

## Kaalinta Beraleydu Dhaqaalaha kaga jirto

Beeraleydu kaalin weyn bay ku leeyihiin dhaqaalaha; maxaa yeelay waxay soo saaraan cuntada dadkeennu cuno. Iyaga ayaa soo saara tacabka beeraha ee kala duwan ee dibedda loo dhoofiyo iyo kuwa warshadaha waddanka gudihiisa ku yaal lagu sameeyo; sida warshadda «ITOP», halkaas oo dad badani shaqo ka helaan. Beeraleydu markii ay iibiyaan waxa beeraha uga soo baxa, waxay iibsadaan waxay u baahan yihiin, sida hilibka, caanaha, dharka iyo wixii kale ee ay u baahdaan. Taasi waxay keentaa in ganacsigu fido, dhaqaaluhuna kor u kaco. Arrimahaas oo dhani waxay innoo caddeynayaan, inay beeristu tahay asaaska ugu weyn ee dhaqaalaha waddankeennu ku dhisan yahay, beeraleyduna yihiin lafdhabartii mujtamaceenna hantiwadaagga ah.

## Kacaankii Oktoobar iyo Hormarinta Beeraha



Horumarka dhaqanka iyo dhaqaalaha dadka Soomaaliyeed wuxuu ku xiran yahay tacabka beeraha oo la kordhiyo. Taas waxaa ku dhawaaqay Kacaankii 21kii Oktoobar. Hirgelinta arrintaas daraaddeedna Dawladdu waxay ka qaaday dhinaca beeraha tallaabooyin waaweyn oo ay ka mid yihiin:

### 1. Mashaariicda Beerista

Si loo kordhiyo dhulka la beero, korna loogu qaado waxa soo saaridda beeritaanka, waxay Dawladdu bilowday inay fuliso mashaariic waaweyn oo kala duwan. Mashaariicdaas waxa ka mid ah Mashuuca Biyo Xireenka Faanoole ee laga sameeynayo Degmada Jilib, Jubbada Hoose. Waxaana lagu tala jiraa inuu waraabiyo sideed kun oo hektaar oo dhul cusub ah. Mashruuca waxaa laga heli doonaa shan kun oo (kiilo waat) oo xooggaa korontada ah. Waxaa kale oo ka mid ah Mashruuca Biya Xireenka Jawhar, Mashruuca Suufka ee Balcad oo gaara 10 kun oo hektar, iyo Mashruuca Waraabinta ee Moordiinle oo gaara 3,00 oo kun oo hektar. Waxa intaas raaca mashaariic

badan oo laga hirgeliyey degmooyin kala duwan oo fara badan.

### 2. Mashruuca Beerista Degdegga ah (karash Programe)

Mashruucaas muhiimka ahi wuxuu la dhashay kacaankii Oktoobar, ujeeddadiisuna waxay tahay in la kordhiyo cunta soo saaridda waddanka, in shaqo loo abuuro dhallinyarada Soomaaliyeed, lana baro sida waxa loo beero, iyo in la fidiyo dhulka wax lagu beero. Dhulka mashruucu wuxuu ku dhowyahay siddeed kun oo hektar, waxaana ka shaqeeya dad ka badan lix kun oo qof, welina waa socdaa, waana kordhayaa.

### 3. Daryelida Beeraha

Shaqada wakaaladdu waxa weeya in ay beeraleyda ka iibsato wixii ay soo saareen, oo ay ka siisato sicir loo gooyay. Marka ay iibsadaan tacabka waxay u diraan degmooyinka iyo gobollada, markaas ayaa dadka lagaga iibiyaa sicir jaban.

Sidaas beeraleydu waxay kaga raysteen dadkii tujaarta ahaa ee tacabkooda ka dhici jiray. Dadweynuhu wuxu ka raystay sicirkii marba is beddeli jiray ee aanay jirin wax lagaga tala galaa.

### 4. Wakaaladda cagaf-cagafta iyo Alaabta Beeraha

Si sancada cusub loo gaarsiiyo beeraha, si wax soo saariddu kor ugu kacdo iyo si shaqada beerisatu ugu fududaato beeraleydu. kacaankeennu wuxuu xoogeeyay Wakaaladda cagafta iyo qalabka beeraha. Wakaaladda shaqadeedu waxay tahay in ay beeraleyda sicir jaban ugaga kireeyaan cagafta. Wakaaladdu waxa kale oo ay beeraleyda ka iibisaa abbuurka iyo wixii kale oo ay beeruhu u baahan yihiin.

### 5. Iskashatooyinka

Ujeedadu waxay tahay in lagu daryeelo danaha dadka beeraleyda, farsama yaqaanka, kalluumeystada, iyo dadka kale ee sancooyinka kale haya. Si ay u kordhiyaan aqoontooda iyo qalabkooda, si ay uga faa'iideystaan tacabkooda iyo si ay u helaan aqoon wanaagsan, waxa lagu kaalmeeyaa aqoon iyo qalab

wixii ay u baahdaan. Waxayaalaha waddankeenna lagu beero waxaa ka mid ah, galley, maseggo, bariis, cudbi, digir, qasab, iyo sisin, waxaa kale oo lagu beeraa waddanka gudihiisa khudaar iyo miro macaan.

**Weydiin**

1. Maxaa lagama maarmaan u ah wax beerista ?
2. Maxaa guga iyo dayrta wax loo beeraa ?
3. Immisa meelood bay beeruhu biyo lagu waraabiyo ka helaan ?
4. Maxaa loo sameeyaa shaqada diyaarinta dhulka ?
5. Ka hadal nolosha beeraleyda ?
6. Ka hadal kaalinta ay beeraleydu ku leeyihiin dhaqaalaha waddanka ?
7. Ka hadal kacaanka Oktoobar iyo horumarka beeraha ?
8. Ka hadal mushruuca cuntada degdegga ah ?
9. Ka hadal Iskaashatooyinka beeraleyda ?
10. Ka hadal shaqada wakaaladda horumarinta beeraha ?
11. Ka hadal shaqada Wakaaladda Cagafta iyo qalabka beeraha ?

Casharka Lixaad

# KALLUUNKA IYO KALLUUMEYSATADA



Biyaha badaha, webiyada iyo badaha yar yar, waxaa ku nool waxyaalo fara badan oo uu ka mid yahay kalluunku. Jirka qofku wuxuu u baahan yahay borootiin, wuxuuna helaa marku cuno hilibka xoolaha, digaagga iyo kalluunka. Waxaa jira quruumo fara badan oo ay ka mid tahay Jabbaan oo

xooluhu ku yar yihiin cuntadooduna ay u badan tahay kalluun. Waxaa kale oo jira kuwo dhaqaalahoodu ku xiraan yahay kalluumeysiga sida Aysland (Yurub). Dhulkeennu wuxuu leeyahay xeeb dhererkeedu ka badan yahay saddex kun oo kiilomitir, kuna taal Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. Waxaana dhex mara labada webi ee Jubba iyo Shabeelle. Badaheennu iyo webiyadeennu waxay hodan ku yihiin kalluun noocyo badan leh. Kalluunka badda waxaa ka mid ah tabadiin, tarraaqad, shiiraan, dhuubaani, summaan, tartabo iyo madax-dhagor.

Dadka dega baddeenna xeebaheeda iyo webiyada way jecel yihiin cunidda kalluunka, siyaabo kala duwan bey u bislaystaan. Meelaha ka fog xeebaha iyo webiyada, dadka dega waxaa gaara kalluunka qasacadeysan oo keliya, welina ma fidin cuniddiisu. Sidaas daraadeed, dadku aqoon fiican uma laha kalluunka iyo faa'iidadiisa. Dad badan baa waxay ku faanaan inaynan kalluunka cunin, taasina mid toosan oo lagu faani karo ma aha, waxaana ugu wacan aqoon darri. Markii dadkaas oo kale degaan Magaalo Xeeb leh, si dhaqso ah bay u bartaan, una jeclaadaan cunidda kalluunka.

**Kalluumeysiga iyo Kalluumaysatada**



Siyaalaha kalluunka loo ugaarsado way kala duwan yihiin, waxaana ka mid ah huuriyaal lagu jillaabto, ama shabaq-

yo ama cilimo. Badi kalluumeysatadeennu waxay qaataan Huuriyaal iyaga oo sita shabaaq leh dulduleel uusan markuu galo kalluunka weyni ka bixi karin, laakiin midka yari ka bixi karo. Ujeeddadu waa in la dhaafo kalluunka yar yarka ah, si uu u waaweynaado, una tarmo. Huuriyada kalluumeysigu waa yar yar yihiin, waxaana ku ugaarsan kara qof ama labo keliya. Waxaase jira in dawladdu keentay kuwo motoor leh, oo dhwr qof qaada. Sanad walba kuwaasi way soo badan doonaan, tan iyo inta ay beddelayaan kuwa yar yar ee aan motoorka lahayn. Kalluumeysatadu waxay ku kallahaan arooryada hore, markii ay isku duwadaan qalabkooda ugaarsiga. Shabaqyada waxay ku daadshaan meeshii ay is yiraahdaan kalluun badan baa jooga, markii ay buuxsamaan ka dibna way soo urursadaan. Shaqada kalluumeysigu ma aha mid fudud. Sababtu waxa weeye, kalluumeysatadu waxay shaqeeyaan iyada oo ay baddu kacsan tahay, Roob iyo dabaylana jiraan, halisna waxay u yihiin in bahal badeed dilo. Sidaas daraadeed waxay inooga baahan yihiin, waajibna inagu ah, inaynnu dhibaatadooda ogaano. Kalluumeysatuhu kalluunkiisa wuxuu u dhiibaa iskaashatada si ay suuqa uga iibiso.

Haddii warshaddi ku taal magaaladiisana, iyada ayuu ka iibiya, haddii kale isagaa iskiisa suuqa ula aada.

## Ahmiyadiisa Dhaqaale

Kalluunku kaalin weyn buu ku leeyahay dhaqaalaha waddanka. Marka ugu horreysa kalluunmeysigu waxa uu ku xiran yahay dad fara badan, kuwaas oo ah kalluumeysatada iyo reerohooda. Waxa kale oo jira warshado dhawr ah, oo ka shaqeeya sameynta iyo dibed u dhoofiska, kalluunka lacag badan baana waddanka ka soo gasha. Warshadahaasna waxaa ka shaqeeya shaqaale badan. Warshadahaas waxaa ka mid ah kuwa ku yaal Laas-Qoray, Qandala, Xaabo, iyo Caluula. Waxay u sameeyaan kalluunka siyaalo kala duwan oo ay ka mid yihiin: Cusbaynta, Qiijinta, Qallajinta Qaboojinta iyo Qasacaynta. Halkaas waxaa inooga caddaatay in kalluumeysigu ahmiyad weyn u leeyahay dhaqaalaha waddanka. Kacaankeennu isaga oo taas ogsoon, wuxuu ku dhaqaaqay in wax laga qabto sidii aqoonta kalluumeysiga loo kordhin lahaa, in la badiyo iskaashatooyinka kalluumeysatada,isla markaasna kor loo qaado habka kalluumeysiga iyo nolosha kalluumeysatada.

Sidaas daraadeed waxaa la dhisay Wasaarad cusub oo lagu magacaabay Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda. Shaqooyinka Wasaaraddaas waxaa ugu weyn:

1. Inay ka shaqeeyso sidii looga faa'iidaysan lahaa badaha waddanka.
2. Inay kordhiso Warshadaynta iyo suuq gelinta kalluunka Dibedda loo dhoofiyo.
3. Inay cusboonaysiiso habka kalluumaysiga iyada oo gacan ku siinaysa iskaashatooyinka kalluumeysatada sidii ay u heli lahaayeen qalab iyo doonyo cusub.

Si aqoonta Kaluumeysiga kor loogu qaado looguna fidiyo dad weynaha, Dawladdu waxay dhistay Dugsi Sare oo laga barto habka iyo Teknoloojiyada cusub ee Kalluumeysiga.

## Weydiin

1. Xaggee buu kalluunku ku nool yahay ?
2. Borotiinka jirku u baahan yahay, maxaa laga helaa ?
3. Magacaw saddex nooc oo kalluunka badaheena ka mid ah ?
4. Immisa bay dherer la'eg tahay xeebta dalkeennu?
5. Ma toosan yahay qofkii aan cunin kalluunka, adiguse ma cunta kalluunka ?
6. Maxaa ugu wacan dadka qaarkii inuusan cunin kalluunka ?
7. Tilmaan siyaalaha kalluunka loo ugaarsado ?
8. Maxaa shabaaqa dulduleel loogu yeelaa ?
9. Goormay kalluumeysatadu shaqada u baxaan ?
10. Xaggee bay shabaqa ku daadshaan ?
11. Tilmaan huuriyada Kalluumeysatada ?
12. Ka hadal shaqada Kalluumeysatada, maxayse inooga baahan yihiin ?

13. Immisa nooc baa kalluunka loo sameeyaa ?

14. Wax ka sheeg shaqada iskaashatada Kalluumeysatada ?

15. Magacaw laba ka mid ah Warshadaha Kalluunka sameeya ?

16. Muxuu ka qabtay Kacaankii 21 Oktoobar horumarka Kalluumeysiga ?

### Shaqa Guri

1. Soo samee khariiddadda xeebaha Soomaaliya, oo ku tilmaan meelaha warshadaha Kalluunku ku yaalliin.
2. Soo Sawir nin Kalluumeysta ah iyo qalabkiisa.

Casharka Toddobaad

# ISKAASHIGA IYO ISKAASHATOOYINKA

«Waxaa inagu waajib ah inaynnu ogaanno woligeen in aayatiinka dambe ee Ummaddu uu ku xiran yahay niyadda shacbigeenna, haddaynnu shaqeeyno inagoo wadajira, iskuna xiran, waynu ka hor tegeynaa, kana adkaanaynaa dhibo kasta oo naga hor yimaadda».

Jaalle Siyaad. (Qeybid).

## Iskaashiga

Iskaashigu waa arrin aad loogu bahan yahay oo lagama maarmaan u ah nolosha bulshada. Waana tiirarka asaasiga u ah nolosha Hantiwadaagga Cilmiga ku Dhisan. Haddii aynnu fiiro u yeelanno nolosheenna, waxaynnu arki karnaa in iskaashigu ka bilaabmo guriga iyo qoyska. Qoyskii aan xubnihiisu iskaashan oo kan weyni midka itaalka yar gacan siin, kama hor tegi karo dhibaatadii ka hor timaadda. Sidaa daraadeed, waxaa carrurta laga rabaa inay ku kaalmeeyaan waalidkooda shaqada markii ay dugsiga ka yimaadaan, durustoodana akhristaan. Mana aha inay wax walba ka sugaan in dadka waaweyni u sameeyo ee waa inay qabtaan shaqadii ay awoodi karaan. Sidaas baa lagu gaari kara dhismaha qoyska hagaagsan ee asaaska u ah bulshada hantiwadaagga.

Dugsigu waa meel kale oo lagu arki karo faa'iidada iskaashigu leeyahay. Dugsigii ay waalidiinta ardayda iyo barayaashuna iskaashadaan waa dugsi toosan, ardaydiisuna aad bay ugu horumartaa xagga waxbarashada.

## Iskaashatooyinka

Iskaashatooyinku waa urur dhaqaale oo ku dhisan dad isku shaqo ah oo isu geystey awooddooda iyo hantidooda, si heerka wax soo saaridda iyo aqoonta qofka kor loogu qaado, isla markaasna in ay kor u qaado nolosha dhaqaalaha iyo ijtimaaciga ah ee xubnaha iskaashatada. Si nolosha dadkeennu kor ugu kacdo, dhinaca dhaqaalaha iyo dhinaca ijtimaaciga

ah, lana baabi'iyo isku dulnoolaadka. Dawladdu waxay soo saartay sharciga lambarkiisu yahay 40 ee dhaqan galay bishii Oktoobar 1973 kuna saabsanaa hormarinta iskaashatooyinka dalka J. D.S. Dhismaha iskaashatooyinku wuxuu shardi lagama maarmaan u yahay hormarinta dhaqaalaha, nolosha ijtimaaciga iyo horukaca dhaqanka. Wuxuuna dadweynaha u horseedayaa dhaqaale ku dhisan caddaalad ijtimaaci ah, sinnaan yo nolol fiican. Sidaas daraadded qaybta iskaashiga iyo qaybta dhaqaalaha ee dawladda maamushaa waxay ahaanayaan oo ka mid yihiin dhismaha uu ku taagan yahay mustaqbalka hantiwadaagga ee dalkeenna.

**Ujeeddooyinkooda.**



In kasta oo ay ururrada iskaashatooyinku kala nooc yihiin, taas oo ay keentay qaybta mid waliba kaga jirto dhaqalaha waddanka, haddana ujeeddadooda guud waa mid. Taas oo ah in iskaashatadu dadka ay ka kooban tahay isku biirsadaan awooddooda iyo hantiddooda. Si ay kor ugu qaadaan wax soo saaridda iyo adeegaba iyagoo cuskanaya Teknoloojiyada cusub iyo habka shaqada ee hantiwadaagga ah. Sidaasna kor

ugu qaadaan dhaqaalahooda iyo noloshooda ijtimaaciga ah. Isla markaana lagu gaaro iskufillaansho dhaqaale. Kacaankeenu wuxuu abuuray iskaashatooyin kala duwan, kuwaas oo ah:

### Iskaashatooyinka beerleyda

Ujeeddooyinkoodu waa inay meel isugu geeyaan xoogga iyo hantida beeraleyda saboolka ah, si wax soo saariddoodu u korodho, nolol dhaqaale oo fiicanna markaas u gaaraan. Dawladda Soomaaliyeed waxay gacan ku siisaa dhinaca cagafta, abuurka, xannaanda dhirta iyo dhinaca farsamada beeraha iyo maamulka guud ahaan, waxayna ku dadaashaa inay ascaar wanaagsan ku helaan wixii u soo go'a.

### Iskaashatooyinka Farsamada

Waxay ka dhisan yihiin magaalooyinka, ujeeddooyinkooduna waxaa weeye inay isu ururiyaan farsamayaqaannada iskood u shaqaysta. Markaas qalabkooda iyo aqoontooda isku darsaddaan si waxtarkooda iyo wax soo saariddooduna u kordhaan, baahida iyo shaqa la'aantana uga baxaan. Iskaashatooyinka farsamada waxaa ka mid ah kuwa dharka Alindiga, kalluumaysatada, dhagaxa. iwm. Dawladdu waxay ka caawisaa dhinaca maamulka, qalabka shaqada, suuq gelinta waxay soo saaraan, iwm. Hirgelinta iskaashatooyinka hantiwadaagga ah ee dalkeenna waxay asaas u tahay horumarka dhaqaalaha waddanka iyo nolosha dalkeenna. Sidaas daraddeed, waa waajib inaynnu yar iyo weyn qayb ka qaadanno hirgelinteeda.

### Weydiin.

1. Waa maxay iskaashigu ?
2. Xaggee buu ka bilawdaa iskaashigu ?
3. Sidee bay isu kaashadaan xubnaha qoysku ?
4. Waa maxay iskaashatooyinku ?
5. Ka warran iskaashiga dugsiga ?
6. Sheeg saddex iskaashatooyin magacyadooda ?

7. Sheeg kaalinta dhaqaalaha ee iskaashatada ?
8. Ayey dawladdu u sameeysay iskaashatooyinka beeraleyda ?
9. Ka hadal ujeeddooyinka iskaashatooyinka farsamada ?
10. Sidee dawladdu u caawisaa iskaashatooyinka ?
11. Beeshiinnu iskaashato ma leedahay ?
12. Aabbahaa iskaashato ma ku jiraa ? Sheeg magaceeda ?

## Shaqa guri

1. Ardaygu waa inuu ka soo dhigaa shan tix (hadal) iskaashatada farsamada ?
2. Waa inuu ardaygu soo qoraa magacyada iskaashatooyinka dalka Soomaaliyeed ?

## Xusuus

Baraha waxaa laga codsanayaa inuu ardayga ka dhadhiciyo weeraha laga helo darsiga dhexdiisa, si fududna ugu tilmaamo. Barahu ha hubiyo, inuu ardaygu gartay macnaha iskaashatooyinka. Waa inuu barahu tilmaan ka dhigtaa iskaashatooyinka dugsiga beeshiisu leedahay.

Waa inuu u yeeraa cid ka socota iskaashatooyinka degmada ee beesha, si ardaygu kaga qayb qaato casharka.

Casharka Siddeedaad

# ISU BAAHNAANTA IYO ISLA JIRKA

## Xiriirka Dadweynaha

### Anigu keligay ma noolaan karaa ?

Qofka bani-aadamka ahi wuxuu u baahan yahay beel uu ku dhex noolaado. Beesha la'aanteed, qofku ma noolaan karo. Soomaalidu waxay tiraahdaa:

«Far kaliyihi fool ma dhaqdo»

«ilko wada jir bay wax ku gooyaan».

Ujeeddada xigmadaasi waxaa weeye inaynan dadku kala maarmi karin oo la isu baahan yahay. Qofku qof buu u baahan yahay. Dadka dunidu qof qof uma noola ee waxay u nool yihiin beel beel, ama bulsho bulsho. Qofna keligii ma noolaan karo. Anigu keligay ma nolaan karo.

Nolosha dadka beesha ku wada nool waxay ku dhisan tahay shaqo, shaqaduna waa qaybsan tahay. Qofku shaqo gaar ah ayuu beesha u hayaa. Guud ahaan shaqadaasi beesha faa'iidooyin badan ayey u leedahay. Qof xooluhuu dhaqaa, xoolaha waxaan ka hellaa Hilib, Harag, Caano, iyo lacag. Qof beertuu falaa oo waa beeraley, Beerta waxaan ka hellaa cunno. Qof waa macallin oo wax buu na baraa, waana na hanuuniyaa. Qof waa takhtar oo waa na daaweeyaa, cudurradana waa noo sheegaa, Qof waa fuundi oo guryahuu noo dhisaa. Qof waa najaar oo alwaaxduu ka shaqeeyaa. Qof waa birmaal oo wixii bir laga sameeyo ayuu inooga shaqeeyaa.

Qof waa qoryo iyo dhuxul gure oo wuxuu ka shaqeeyaa wixii aan wax ku kullansanno. Qof waa Aaskari oo nabadgeliyada ayuu ilaashaa, qof dhaqaalaha dalka ayuu ilaasha oo canshuurtuu qaadaa. Qofba meel ayuu beesha ama mujtamaca shaqo ugu hayaa. Qof walba shaqadiisa waa loo baahan yahay.

Waxaad u baahan tahay waxaad cuntid, waxaad cabtid, waxaad huwatid, waxaad qaadatid, meel aad seexatid, wax-

barasho, caafimaad, nabadgeliyo, maaweelo, iyo wax kasta oo oo aad u baahaan tahay. Intaas oo dhan qof kale ayaa kaaga shaqeeya oo aad ka heshaa. Qof kastana waa kula mid. Inta aad u baahan tahay ayuu qofka kale u baahan yahay; Aduu kuu baahan yahay; Aduu kaaga baahan yahay, beeshuu uga baahan yahay.

Sidaas darteed waxaa la yiraahdaa, qofku waa beel ku noole, asaguna wax buu taraa dadka uu la nool yahay, ayaguna wax bay taraan. Marka waxaan oran karaa dadka xiriir weyn baa ka dhexeeya. Xiriirka ka dhexeeyaa waa xiriirka dhaqalaha. Xiriirka dadka waxaa abuura dhaqaalaha, dhaqaaluhuna wuxuu ku yimaadaa isla jirka dadweynaha.

### Weydiis

1. Muxuu qofka bani-aadamka ahi u baahan yahay ?
2. Sheeg ujeeddada laga leeyahay maahmaahda ah:- «Ilko wada jir bay wax ku gooyaan» ?
3. Maxaanay dadku u kala maarmin ?
4. Maxaa xoolaha laga helaa ?
5. Waa maxay xiriirka dadka ka dhexeeyaa ?

### Shaqa Guri

1. Ka soo qor 6 sadar, waxaa aad uga baahan tahay beeshaada.

Casharka Sagalaad

# XAFIISKA SIYAASADDA M. G. S. K.

Shaqooyinkii waaweynaa ee Kacaanku ku dhaqaaqay bilowgiisii, waxaa ka mid ahaa dhismihii Xafiiska siyaasadda. XAFIISKAAS markiisii hore waxaa lagu magacaabay Xafiiska xiriirka dadweynaha. Ka dibna wxaa lagu magacaabay Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka. Ujeeddada Xafiisku waa inuu u noqdo asaas dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga ah. Xafiiska saldhigiisu waa magaala madaxda Muqdisho, laamana wuxuu ku leeyahay dhammaan gobollada, degmooyinka, tuulooyinka iyo xaafadaha Magaalooyinka. Saldhigyada laamahaas waxaa loo yaqaan golayaasha hanuuninta dadweynaha.

## Shaqada Xafiiska iyo Laamahiisa

Xafiiska shaqaadiisa waxa ka mid ah kicinta iyo midaynta dadweynaha. Kor u qaadidda garashada siyaasiga iyo ijtimaaciga dadweynaha iyo fidinta mabaadi'da cilmiga ku dhisan. Xafiisku wuxuu leeyahay xubno kala duwan ay mid waliba shaqa gaar ah u qaybsan tahay, waxaana ka mid ah:

1. Madaxtooyada dhexe.
2. Ururrada ijtimaaciga ah.
3. Baarista iyo buug gelinta.
4. Isku xiridda ururradeenna iyo kuwa adduunka.
5. Baraarujinta iyo dhaqaajinta dadweynaha.
6. Fidinta.
7. Maamulka.

Waxaa jira urrurro ijtimaaci ah oo hoos yimaada xifiiska.

Uruurraddaas waxaa ka mid ah kuwa xoogsatada, ardayda iyo dumarka. Xafiisku wuxuu ka shaqeeyaa inuu isku xiro uruurradeenna bulshada iyo kuwa la midka ah ee adduunka kale ee horusocodka ah. Maamulka iyo hoggaaminta uruurrada

bulshada, xafiisku wuxuu u soocay dad tababarro iyo aqoon gaar ah u soo qaatay.

Laamaha Xafiiska ee ka furan Gobollada, Degmooyinka iyo xaafadaha magaalooyinka waaweyn waxaa xafiiska wakiil uga ah qof aqoon siyaasi ah oo dheer leh. Shaqadiisuna waxay tahay inuu fuliyo siyaasadda guud ee Xafiiska ee ku saabsan mideynta shaqada iyo fikradda dadweynaha kacaanka ah iyo hirgelinta mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan.

### Weydiin

1. Goormaa la aasaasay Xafiiska siyaasadda M.G.S. K. ?
2. Maxaa loo aasaasay Xafiiska Siyaasadda M.G.S.K.?
3. Waa maxay shaqada Xafiiskaasi uu qabtaa ?
4. Waa immisa xubnaha Xafiiskaasi ?
5. Magacow ururrad hoos yimaada Xafiiska ?
6. Muxuu Xafiisku isku xiraa ?
7. Yaa Xafiiska wakiil u ga ah, degmooyinka, gobollada iyo tuulooyinka ?

   Maxayse fuliyaan ?

### Shaqa Guri

1. Ka soo qor 5 sadar golaha hanuuninta dadweynaha.

**Casharka Tobnaad**

# REER GUURAAGA

Dadkeena Soomaaliyeed intooda badani waa reer guuraa. Qoyska reer guuraagu wuxuu qoyska beeraleyda iyo reer magaalkaba kaga duwan yahay isagoo aan lahayn meel gaar u ah uu deggan yahay. Reer guuraagu wuxuu meel degganaadaa intii ay xoolihiisu meeshaas ka helayaan daaq wanaagsan iyo biyo ku filan. Markii intaas la waayona way guuraan oo meel kaloo dhaanta bay xoolahooda la aadaan.

## Guryaha Reer guuraaga



Guryaha reer guuraagu way ka duwan yihiin kuwo reer magaalka. Reer guuraagu waxay ku nool yihiin aqallo si dhib yar loo furfuri karo, awrtana loogu rari karo, markii ay damcaan inay guuraan. Aqalada dhismohoodu waqti yar buu qaataa markii ay degaan. Aqalka reer guuraagu waxa uu ka samaysan yahay, una qaybsamaa afar qaybood kuwaas oo ah:

Dormooyinka iyo raarka oo aqalka lagu dedo, ama korka laga saaro,Udbaha oo ah tiirarka aqalku ku taagan yahay, dhigaha iyo loolka oo ah kuwa uu ka kooban yahay dhiska

guud ee Aqalka, Gurgurka iyo maacuunka oo ah weelasha waxa lagu shubto. Afartaa qaybood ee waaweyn, qayb waliba way sii qaybsanta, hadba isticmaalka ama ujeeddada sheygu leeyahay. Aqalka reer guuraagu wuxuu dhammaan ka sameesan yahay: Qoryaha, cawska iyo mayraxda dhirta miyiga laga helo. Weelka wax lagu shubto qudhiisa in yar oo macdan iyo quraarad ah mooye, waxaa laga sameeya dhirta miyiga ka baxda iyo saanta xoolaha.

## Shaqada Reer guuraaga

Reer guuraagu waxay dhaqdaan xoolo ay ka mid yihiin: Geela, ariga iyo Lo'da. Waxayna ku nool yihiin caanaha iyo hilibka xoolahaas. Shaqada iyo nolosha reer guuraagu aad bay u adag tahay. Iyaga iyo xoolahooduba waxay halis u yihiin dhibaatooyin fara badan; kuwaas oo ay ka mid yihiin biyo la'aanta, daaq la'aanta iyo bahallo halis geliya nafsadooda. Noloshoodu waxay u badan tahay geedi joogta ah. Taas oo ay keentay raacidda ay raacaan hadba meeshii roob ka da'o ama daaq iyo biyo lagu sheego. Sidaas daraaddeed qofka reer miyiga ahi waa samir iyo adkeysi badan yahay, gaajada iyo haraadku uma karaan sida ay reer magaalka u karaan.

## Reer guuraaga iyo dhaqaalaha waddanka

Reer miyigu kaalin weyn bay ka qataan dhaqaalaha wadanka. Marka ugu horeysa sida aan horay u soo sheegnay dadkeenna badidiisu wuxuu ku nool yahay miyiga. Taas waxaa soo raaca in waxa waddanka dibidda looga dhoofiyo sanad walba ay u badan yihiin xoolaha nool iyo wixii ka soo baxaa, halkaas oo waddanka lacag badani ka soo gasho. Waxaa kaloo raaca in reer miyigu ay keenaan magaalooyinka caano, subag, hargo iyo hilib si ay uga iibsadaan reer magaalka. Lacagta ka soo gasha xoolahooda waxay ku iibsadaan waxyaalaha ay u baahan yihiin sida; dharka, cuntada, macuunka iwm. Waxaa kaloo jira warshado dhowr ah oo ay ka mid yihiin warshadda caanaha ee Muqdisho, Warshadda hargaha ee Muqdisho iyo Warshadda Hilibka ee Muqdisho iyo Kismaayo, Warshadahaasi waxay ka shaqeeyaan caanaha, xoolaha iyo hargaha ay reer guuraagu keenaan, waxaana ka shaqeeya dad fara badan oo Soomaali ah. Runtuna waxay tahay inaan la

koobi karin kaalinta reer guuraagu ku leeyahay dhaqaalaheenna maxaa yeelay iyaga iyo beeraleydu waa labada kooxood ee dhaqaalaha wadaankeennu ku dhisan yahay.

## Kacaanka Oktoobar iyo Horumarka Reer guuraaga

Tallaabooyin waaweyn ayaa kacaanku ka qaaday sidii kor loogu qaadi lahaa nolosha dhaqaalaha iyo midda ijtimaaciga ee reer guuraaga. Maxaa yeelay kacaanku wuxuu aqoonsaday inaan horumarka dadweynaha laga hadli karin haddii aan wax laga qaban dhibaatooyinka hor jooga reer guuraaga.

## Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah

## Biyaha iyo Daaqa



Biyaha iyo daaqu waa dhibaatada ugu weyn ee weligeed haysata reer guuraaga. Taliska Kacaanku si arrintaas looga hor tago wuxuu dejiyey barnaamij dheer oo ku saabsan in la qodo ceelal iyo warar badan una qaybsan degmooyinka waddanka oo dhan, si waqti walba xoolaha iyo dadku ay biyo u helaan.

Dhinaca daaqana waxaa jira barnaamij kale oo ku saabsan sidii dhulka looga dhowri lahaa nabaadguurka, xirmooyinna loo samayn lahaa waqtiga barwaaqada, si xooluhu u da-

aqaan jiilaalka. Tirada xoolaha iyo daaqa dhulkana waa la hagaajinayaa, la isuna qiyaasayaa.

## Dhinaca la dagaallanka Cudurrada Xoolaha

Xoolaha waxaa ku dhaca cudurro fara badan, bahallana way qaniinaan. Haddii aan cudurradaas iyo bahalladaas laga hortegin oo aan xoolaha la daaweyn, waxaa dhacda in xooluhu si aad ah u le'daan. Si aynan taasi u dhicin Dawladdu waxay reer guuraaga siisaa daawooyinka xoolaha, waxaana waddanka oo idil ku wareega dad cilmi u leh cudurrada xoolaha si ay u Tallaalaan xoolaha ulana socdaan hadba caafimaadka xoolahu sida uu yahay.


## Dhinaca Nabadgelyada

Kacaanka ka hor reer guuraagu marna ma helin nabad run ah. Dhac iyo dagaal joogta ah bay nolosha reer guuraagu badankeedu ahayd. Kacaanku si dhab ah buu u joojiyey dagaaladaas foosha xun ee halista geliyey nolosha dhaqaalaha iyo Ummadnimada dadkeenna. Maanta qoys Soomaali ah oo jamhuriyada gudeheeda deggani cabsi kama qabo in la dhaco ama ceel loo diido ama la yiraahdo dhulkaas xoolahaasu ma daaqi karaan. Taasina waa horumar iyo guul weyn.

## Ololaha Horumarinta Miyiga

Ujeeddadiisu waxay tahay in reer guuraagga la baro sidii ay wax u qori lahaayeen waxna u akhriyi lahaayeen, iyo in lagu daaweeyo laguna tiriyo dadka iyo xoolaha muddo sanad dhexdiis ah. Sidaas daraaddeed kumanyaal arday iyo Macallimiin leh ayaa loo diray miyiga Soomaaliyeed. Ololuhu markii uu dhammaado waxaa ka soo noqon doona arday iyo Macallimiin ka duwan kuwii miyiga aaday. Waxayna miyiga uga imaan doonaan reer guuraa ka duwan kuwii hore. Sababtu waxay tahay in la kala faa'iidaystay. Reer guuraaga waxaa u kordhay cilmi, aqoon cusub iyo garasho ay gartaan inaan Dawladda iyo xubneeheedu u dhisnayn reer magaalka oo keliya, ee ay ka dhexeeyaan dadka Soomaaliyeed oo idil. Ardayda, Macallimiinta, iyo shaqaalaha kale waxay soo noqonayaan ayagoo waxyaala badan ka soo faa'iidaystey miyi-

ga. Waxaa ay soo faa'iidasteen waxaa ugu weyn aqoonta dheeraadka ah ee ay ka heleen. Reer miyiga maxaa yeelay



waxay soo barteen dhaqanka, dhaqaalaha, Afka iyo nolosha guud ee Ummaddooda.

**Weyddiin**

1. Muxuu aqalka guuraagu kaga duwan yahay aqallada reer Magaalka ?
2. Maxaa ugu wacan in reer guuraagu beddelo meesha uu deggan yahay ?
3. Waa immisa qaybood aqalka reer guuraaga ?
4. Maxay aqalkooda iyo alaabtooda ku rartaan reer miyigu ?
5. Magacaw xoolaha reer guuraagu dhaqdo ?
6. Sheeg sabab caddeynaysa kaalinta reer guuraagu ay kaga jiraan dhaqaalaha dalka ?
7. Miyiga weligaa ma tagtay ? Maxaad ku aragtay haddii aad tagtay ?
8. Sheeg waxa miyigu magaalada kaga duwan yahay ?

9. Muxuu kacaanku ka qabtay ?
   b) dhinaca biyaha iyo daaqa

t. dhinaca nabadgelyada
   j ) dhinaca la dagaallanka cudurrada xoolaha ?

10. Sheeg magaalooyinka ay ku yaalliin warshadaha hilibka ?

11. Magaaladee bay ku taal warshadda caanuhu ?

## Shaqa Guri

1. Ardaygu gacanta ha ku sawiro xoolaha reer guuraagu dhaqdo, hana ka sheekeeyo nolosha reer guuraagga.

Casharka koow iyo Tobnaad

# MAGAALADA



Magaalada aad ku noshahay waxay ka mid tahay magaalooyin badan oo ku yaal dalka jamhuuriyadda Dimoqraaddiga ee Soomaaliya. Magaaladu way ka weyn tahay tuulada, waana ka dad badan tahay. Waxayna u qaybsantaa Xaafada badan, oo mid waliba magac gaar ah oo loo yaqaan ay leedahay. Xaafaddu waxay kaloo leedahay Gole dadka xaafadda lagu Hanuuniyo, oo la yiraahdo Golaha Hanuuninta Dadweynaha. Nolosha reer magaalkuna way ka duwan tahay nolosha reer miyiga iyo dadka tuulooyinka dega.

## 1. Jidadka iyo Guryaha Magaalada

Guryaha magaaladu way ka duwan yihiin, waana ka waaweyn yihiin kuwa reer guuraaga. Magaalada waxaa ku badan daaro waaweyn oo dhowr dabaq ah oo ay dhawr qoys ku jiraan inkasta oo ay badan yihiin qoysas keligood guri deggani, tuulooyinku sidaas waa ka duwan yihiin oo daaro sidaas u wa-

aweyn ma leh. Guryaha tuulooyinku badi waa carshaan ama waa Muddullo; qoys walibana wuxuu ku jira cariishkiisa ama Muddulkiisa. Guryaha Magaaladu waxay u qaybsamaan kuwa ka dhisan dhagax, Bulukeeti, Bir iyo Shamiinto, iyo kuwa ka dhisan qori sida Baraakooyinka iyo Carshaanta. Guryaha Magaaladu dibedda iyo gudahaba way ka qurxoon yihiin, Nal iyo biyana way leeyihiin, jidadka magaaladu badanaaba way ballaaran yihiin wayna toosan yihiin, laamiguna wuu ku badan yahay. Jidadkaas laamiga ahi waxay labada dhinac ku leeyihiin meelo dadku maro, waana nadiif, habeenkiina nalal baa lagu iftiimiyaa, jid walibana magac gaar ah oo loo yaqaan buu leeyahay. Guryaha iyo jidadkuba waxay leeyihiin lambarro gaar ah si loo kala garto guryaha iyo jidadka badan ee magaalada Magaaladu waxay leedahay beera kuraas leh oo lagu nasto, tallooyin magac dheer, dukaanno waaweyn, makhaayado, Shineemooyin, hoteello, meelo lagu ciyaaro iwm.

## 2. Gaadiidka

Magaaladu waa weyn tahay, sidaas daraaddeed dadka deggani waxay ku isticmaalaan gaadiid kala duwan, sida baabuurta yar yar iyo kuwa waaweyn, Bushkileetiyada, Mootooyinka iyo Basaska. Reer magaalku markay aadayaan Magaalooyinka kale ama tuulooyinka waxay raacaan baabuur, haddii ay meel fog tahayna waxay fuulaan dayaarad. Magaalooyinka waaweyn ee J.D.S. sida Muqdisho Hargeysa, Kismaayo, Baydhaba waxay leeyihiin meel Dayaaraduhu ku degaan kana duulaan. Meelahaas waxaa layiraahdaa Gegida dayaaradaha, jidadka Magaalooyinka waaweyn dadka socda iyo baabuurtu way ku badan yihiin. Sidaas daraaddeed Dawladdu way nidaamisaa sida loo maro, si shiilalka ka dhaca la isu hor taago. Haddii aad magaalo weyn tagtid waxaad arkaysaa nin boolis ah oo jidka bartankiisa taagan oo gacmaha ku kala duwaya baabuurta, gaariyada iyo dadka. Jidadka qaarkoodna waxaad ku arkaysaa meelo ay ka taagan yihiin nal midabkiisu hadba isbeddelo, oo mar noqonaaya guduud marna hurdi marna cagaar. Nalkaasi wuxuu qabtaa shaqada ninka Booliska oo kale. Guduudka micnihiisu waa joogso Baabuurta kale ha gudubtee, hurdiga micnihiisu waa digtoonow, cagaarkana micnihiisu waa gudub jidku waa kuu furan yahaye. Qofka magaalada jooga waajib waxaa ku ah inuu dhawro ni-

daamka jidadka loo maro si aan naftiisu halis u gelin, dadka kalena naftooda uusan halis u gelinin jidadku badiba waxay leeyihiin meelo loo sameeyey dadku inay maraan. Haddii aad magaalo joogtid, weligaa mar meesha dadka.

### 3. Shaqooyinka Reer Magaalka

Shaqooyinka reer magaalku way ka duwan yihin kuwa reer miyiga. Reer miyiga badidood waa xoola dhaqato iyo beeraley, reer magaalkuse waxay ka shaqaystaan sancad iyo tijaarada, shaqooyinka Dawladda ee kale duwan iyo shaqooyin kale oo badan.

### 4. Sancada

Dad badan oo magaalada dega baa ka shaqeeya dhinaca sancada ama farsamada. Sidaas daraaddeed way fara badan yihiin farsama yaqaannada magaalada oo waxa ka mid ah Birmaalayaal, Qoryaal, Kabbatolayaal, Korontayaqaayaal, qalin shubayaal iwm. Magaalooyinku waxay kale oo ay leeyihiin wershedo waaweyn oo shaqaale badani ka shaqeeyaan sida Warshadda Caanaha iyo tan Hilibka ee Muqdisho, Warshadda Sonkorta ee Jowhar, Warshadda Hilibka oo Kismaayo, Warshadda Dharka ee Balcad. Sancaduna lagama maarmaan bay u tahay horukaca dhaqaalaha Waddanka, sidaas daraadeed Dawladdu waxay ku dadaashaa inay Waddanka ka dhisto warshado badan.

### 5. Tijaarada (Ganacsiga)

Dad badan oo magaalada deggani waxay ka shaqeeyaan gancsiga. Dukaamada magaaladu waa ka waaweyn yihiin kuwa Tuulooyinka. Waxaana ka mid ah kuwa dharka, Cuntada, biraha iyo qoryaha, maacuunka, qalabka guryaha iyo kuwa kale. Ganacsigu wuxuu u qaybsamaa laba qaybood. Qayb Dawladdu maamusho oo ay ka mid yihiin ganacsiga weyn ee Cuntada, alaabta dhismaha, qaybna ganacsatada iskood u maamusha.

## 6. Shaqaalaha Dawladda

Magaalada waxaa deggan macallimiin, qaalliyaal, saraakiil, iyo dad kaloo kala duwan. Kuwaas oo dhan waxaa lagu magacaabaa shaqaalaha Dawladda maxaa yeelay waxay u qoran yihiin Dawladda oo mushaarka siisa. Way ka duwan yihiin shaqaalaha kale oo shirkadaha iyo meelaha kale u shaqeeya oo iyaguna Magaalooyinka deggan.

## 7. Xubnaha Dawladda iyo Danaha Dadweynaha

Dawladdu way ka dhexeysaa dadka Soomaaliyeed oo idil,, reer miyi iyo reer magaalba. Sidaas daraaddeed waxay ku dadaashaa inay magaalo walba iyo tuulooyinka waaweynba ka furto xaafiisyo ka tirsan Xubnaha Dawladda ee ka shaqeeya danaha dadweynaha. Magaalada xubnaha ka furan waxaa ka mid ah; Xafiiska Dawladda Hoose, magaalo walba ama degmo waliba waxay leedahay Dawlad hoose oo maamusha arrimaha magaalada. Waxay ka kooban tahay madaxda xubnaha Dawladda ee magaalada ka furan iyo dad ka tirsan dadweynaha deggan magaalada. Shaqadooduna waxay tahay inay maamulaan kana shaqeeyaan horukaca magaalada.

## 8. Xafiiska Boostada

Magaalo walba iyo tuuladii weynba waxaa ka furan xafiis boosto, Magaalooyinka waaweyn, sida Muqdisho oo kale xaafad walba Xafiiska boosta ayaa ka furan. Boostadu shaqo lagama maarmaan ah bay dadweynaha u qabataa. Haddaad doonto inaad warqad u dirto qof magaalo kale deggan boostada ayaa deg-deg u gaarsiisa, haddii warqad laguu soo dirona waa ku soo gaarsiisaa. Waxaa kaloo boostada lagu diri karaa lana dhigan karaa lacagta.Boostadu waddanka gudihiisa iyo dalalka dibedda ahna wixii lagu diro way gaarsiisaa.

## 9. Saldhigga Booliska

Magaaladu waxay leedahay saldhig boolis, haddii ay weyn tahayna waxay leedahay dhowr saldhig. Saldhigga booliska waxaa ka shaqeeya Askar iyo saraakiil; shaqada booliskuna waxay tahay inay ilaaliyaan nabadgeliyada dadweynaha,

waxayna ilaaliyaan guryaha, dukaanada, Warshadaha iyo Xafiisyada Dawladda. Waxayna qabtaan tuugada iyo wixii gardaran oo idil. Waxaa kaloo dhawraan nidaamka iyo habka magaalo joogga. Sidaas daraaddeed waa inaynu gacan ku siinnaa shaqadooda tusaalayaashoodana raacnaa, maxaa yeelay danteennaa sidaas ku jirta.

## 10. Isbitaallada

Magaaladu waxay leedahay Isbitaal. Isbitaalka waxa ka shaqeeya Takhtarro, Kaaliyayaal iyo shaqaale kale. Shaqadooduna waa dhawrista Caafimaadka dadka. Isbitaalku waa laba qaybood. Qayb dadku waxay qabaan lagu baaro iyo qayb bukaanka la jiifiyo. Takhtarku daawo haddii uu u qoro qofka buka lacag la'aan baa lagu siiyaa, si dadkoo dhani daawo u helaan Isbitaalladu way furan yihiin habeen iyo maalin. Magaalooyinka waaweyni waxay leeyihiin dhowr Isbitaal oo mid walba lagu daaweeyo Cudur ama Cudurro gaar ah.

## 11. Dugsiyada

Dawladdeenna Kacaanka ahi waxay la dagaallantaa aqoon darrida iyo jahliga. Sidaas daraaddeed waxay degma walba iyo tuulo walba ka furtay dugsi wax lagu barto. Magaalada waxaa ka dhisan dugsiyo badan oo u qaybsan dugsiyo hoose, dugsiyo dhexe iyo dugsiyo Sare. Magaalooyinka waaweyn waxaa ka dhisan dugsiyadaas ka sokoow, dugsiyo teknika ah, macaahid iyo Jaamacaad.

## 12. Rugaha Maaweelada

Magaalooyinka waxaa ku badan rugaha maaweelada iyo madaddaalada, sida shinimooyinka golayaasha murtida, iyo madaddaalada, iyo meelaha ciyaaraha sida kubbadda cagta, tan kolayga iyo tan shabaqa. Meelahaas dadku waxay tagaan markii aysan shaqo lahayn iyaga oo la socda Jaallayaashooda, saaxiibadooda iyo deriskooda, si ay waqti wanaagsan oo farax leh ugu dhameeystaan meelahaas.

## Shaqa Guri

Ardaygu ha ka qoro wixii horukac ah ee Dawladdu ka qabatay Xaafaddiisa, Magaaladiisa ama tuuladiisa.

**Weydiin**

1. Maxay magaaladu tuulada kaga duwan tahay ?
2. Ka hadal guryaha iyo jidadka magaalada ?
3. Ka hadal gaadiidka magaalada ?
4. Maxay ka shaqeeyaan reer magaalku ?
5. Magacow magaalooyinka Warshadahani ka dhisan yihiin:

   b) Warshadda Sonkorta

   t) Warshadda Hilibka

   j) Warshadda Caanaha

   x) Warshadda Dharka

   kh) Warshadda Kalluunka

6. Waa maxay shaqada Xafiiska boostadu ? Xaafadaadu ma leedahay xafiis boosto ?
7. Waa maxay shaqada boolisku ?
8. Goormay dadku aadaan rugta maaweelada ?

# DHAQANKA SOOMAALIYEED

Intaan la baran gaadiidka (baabuurta, dayuuradaha iyo maraakiibta), ama aan la aqoonin alaabta isgaarsiinta: Raadiyaha, Wargeysyada, iyo siinamooyinka, Dhaqanka bulshada adduunku wuu kala xirnaa, oo bulsha kastaaba waxay lahayd dhaqan u gaar ah oo aan badhxanayn. Asbaabta dhaqan dal leeyaha dal kale u gudbisey waxay ahayd:

1. Heliddii dhulalka aan horay loo aqoonin.
2. Ganacsiga iyo tacab is dhaafsiga.
3. Gumeysiga iyo hababkiisa kala duwan.
4. Soo saaridda gaadiidka iyo alaabta isgaarsiinta.

Asbaabahaas aan soo sheegnay waxay keeneen, in dhaqanka shisheeyuhu soo galo bulshadeenna Soomaaliyeed. Dhaqanka xun, ha ahaado mid shisheeye, ama mid keenna ahe, meel kuma laha bulshadeenna cusub ee kacaanka ah, Soomaalidu waxay leedahay, dhaqan qoto dheer, oo u gaar ah, Haddaba waa maxay dhaqan ? Dhaqan waa habka ummadi ku nooshahay, ama waa dariiqadda ay ku gaarto nolosheeda. Dhaqanku ma aha wax dugsiya laga barto, mana aha heshiis dadka qorto, ee waa hab iskii uga sameysma bulshada dhexdeeda, kana dhasha isu imaatinkooda iyo meel ku wada noolaadkooda iyo habka dhaqaale ee ay ku nool yihiin. Dhaqanku waa xeer guud oo aan qornayn qofkii jebiyaana ciqaab ayuu ka mutaa bulshada. Ciqaabtaasi waa eegmo xun, eray xun iyo fikrad xun oo dadku kaa qaato, hase yeeshee ma gaarsiisna gacan qaad.

## Dhaqanka maxaa ku faafiya bulshada dhexdeeda

Dhaqanka waxaa ku faafiya bulshada dhexdeeda afka. Afku dhaqan gobol, degmo, magaalo, ama dowladi leedahay ayuu u tallabiyaa kuwo kale. Maxaa yeelay isagay dadku ku wada hadlaan, isku af gartaan, ra'yigana isku dhaafsadaan, waxna ku bartaan, Dhaqanka waxaa u asal ah afka. Af Soomaaligu in kastoo uusan qorayn Kacaanka ka hor haddana wuxuu ahaa mid hodan ah.

## Dharka iyo Habka loo Xidho

Afka waxaa soo raaca dharka iyo habka loo xidho. Bulshadu waa rag iyo dumar, Dharka ay xidhaan iyo habkay u xidhaaniba waa kala jaad. Raggu sida badan wuxuu xidhaa laba go' macawis iyo kabo jaan gari ah. Waxaa jirta dariiqad ninku go'kaliya labada garab ka kala rito. Hubka raggu waa waran iyo gaashaan budh iyo abley, ama waa qaanso iyo gamuun. Dharka dumarku waa maro saddex dhudood ah, boqor iyo gambo, kuul iyo dugaagado, ama waa guntiino iyo gambo.

## Cuntada iyo Sida loo Cuno

Dadka aadamiga ahi cuntaduu ku nool yahay, hase yeeshee qolaba si gooni ah ayey u cuntaa. Soomaalidu waagii hore, rag iyo dumar bay u kala cuntayn jireen, raggu gaar buu u cuni jirey, dumarkuna gooni bay u cuni jireen Habka wadaaggu waa u gaar Soomaalida. Wadaag waalaba qof iyo in ka badan oo xeedho ama hadhuub keliya wax ku wad cuna, ama cabba.

## Maamuuska iyo sooryaynta martida

Adduunka kale kuma badna, ama lagamaba yaqaano in qof aan la aqoonin ama aan xisaab kugu darsanin la sooor. Soomaalidase aad bay marti sooliddu ugu dheer tahay. Cuntada iyo gogosha teeda fiican ayaa martida la siiyaa. Iyadoo aan cunto la waayin baa martida loo loogaa (loo qalaa). Si aad u garato meeshay Soomaalidu ka gaartay sooryada bal dhagayso sheekada soo socota:

Waxaa jirtay haweeneey ninkeedii dhoof ku maqnaa, Afar Caruur ahna haysatay, hantina Ri' ka lahayd ayaa waxaa u yimid niman socoto ah goor habeen ah. Markaasay nimankii shaah u karisay caanihii ridana way ugu caddaysay. Martidii way iska seexatay, illeen xoolo kale meesha ma joogine. Goor dambe ayey haweeneeydii oo xeedho hilib ah wadda nimankii toosisay. Ayagoo yaaban bay weydiiyeen. Xaggeed ka keentay Hilibka ? «Ridii baan idiin qalay»! bay tiri, «Ma ridii aad caanaheeda shaaha noogu caddaysey?» «Haa», oo cayrnimo ceebbaa ka daran «baa la yiri»!! Haweeneeydii baa tiri.

Maamuuska iyo marti sooriddu waa wax asal iyo dhaqan u ah bulshada Soomaaliyeed. Taas waxaa tusaale u ah mashruuca weyn ee Ololaha Horuumarinta reer miyiga waxaan ku hirgelinay saldhigna u ah waa maamuuska iyo marti sooridda hiddaha noo ah. Kumanyaal arday, barayaal, iyo shaqaale ah oo guryahoodii ka tagey baa qoysas ayna aqoon jirin, xcolana ku darsanin la noolaan jirey, xilka iyo waajibka ka saaran ummadoodana gudanaayey.

## Guurka iyo dariiqada la isu guursado

Markay laba qof isuguursanaayaan, ninkaa raadsada gabadha, ee gabadhu ma raadsato wiilka. Xodxodashadu waa gogol dhigga guurka, ninkaana bilaaba, gabadhuna way ku caawisaa. Xodxodashada ka dib, laba hab mid uun baa la raacaa:

1. In gabadha loo fadhiisto, oo aabbeheed la weydiisto.
2. In lala baxo, qoyskoodana lagala dhuunto.

Labadaa hab mid kastoo la raacaba, ninku wuxuu bixin jiray gabbaati (sooryo) iyo yarad. Guurka Soomaalidu waxaa lagu dhammeeyaa sharciga Islaamka. Meherka ka dib waxaa la sameeyaa aroos ama aqal gal. Arooska waxaa loo qabtaa cayaaro iyo Alla bari.

## Weydiin

1. Waa maxay dhaqan iyo hidde ?
2. Maxaa keena in dhaqan dawladi leedahay, mid kale u tallaabo ?
3. Maxay tahay ciqaabta qofka dhaqanka u gafaa ?
4. Sheeg waxyaabo u gaar ah Soomaalida, oo dhaqan iyo hiddo u ah?
5. Dhaqanka maxaa ku faafiya bulshada dhexdeeda.

## Shaqa Guri

1. Ka hadal laba waxyaalo oo u gaar ah dhaqanka Soomaaliya.